



FINS PÅNG

Macluumaad waaliddiinta ku socda Camp Grosvad ka hor

Camp Grosvad 2020 waxaa la qabanayaa iyadoo laga duulayo talooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada, waxaana la waafajinayaa hadba xaaladda markaas taagan. Waa muhiim in aad adigu ka waalid ahaan la socotid xaaladda ku aaddan waxa sanadkan shaqeynaaya.

Xagaaga 2020 wuxuu u muuqdaa mid yara kuwii hore ka duwan iyadoo ay sababtu tahay feyruska cusub ee corona iyo cudurka covid-19. Hawlaha qaarkood waa la baajinayaa, meelaha loo tamashle tagana waa ay xirnaanayaan. Iyadoo laga duulayo talooyinka Hey'adda adeegga bulshada ee ku aaddan in hawlaha dhaqdhaqaaqa ee dhismooyinka dibaddooda ah carruurta iyo dhallinyarada dib loogu billaabo waxay degmada Finspång qaban doontaa Camp Grosvad. Si sida ugu ammaan badan ee suurta gal ah ay ugu noqoto hoggaamiyayaasheenna, carruurta iyo dhallinyaradaba waxaa muhiim ah in aan dhammaan iskaashanno oo aan raacno talooyinka iminka jira.

Tallaabooyin ku aaddan Camp Grosvad 2020

Carruur tiro yar iyo kooxo yar-yar

Sanadkan wuxuu Camp Grosvad aqbali doynaa carruur intii hore ka yar, wuxuuna u qeybinayaa kooxo yar-yar si loo yareeyo khatarta faafitaanka cudurka. Waxaa jiri doono kooxo kuwi hore ka yar-yar, koox walbana waxay lahaan doontaa meelo kala duduwan oo ay ku kulmaan.

Dhaqdhaqaaq dhismooyinka dibaddooda ah oo dheeraad ah, halki marbana 50 qofood

Sanadkan waxay hawlaha dhadhaqaaqu ka dhacayaan dhismooyinka dibaddooda ilaa intii ugu badan ee suurta gal ah, sidaas darteed waxaa muhiim ah in carruurta ay soo qaataan dhar jawiga ku habboon. Marka aan qabaneyno hawlo dhaqdhaqaaq oo dhismooyinka gudohooda ah, sida tusaale ahaan bowling, looxadda sida quraaradda ah, in lagu ciyaaro aluceumka, mar walbana waa hal koox markiiba, marnabana isku hal meel ugama badnaaneyno xadka ah 50 qof ugu badnaan.

Qado leesu soo gurayo

Sanooyinkii hore waxaan lahaan jirnay qado soo gurasho ah laakin sanadkan beddel ahaan qof walba inteeda qadada waa loo soo dhigayaa carruurta, si loo xaqiijiyo nadaafadda iyo si looga fogaado is ciriirinta.

Waxaa tallaabooyinkaas ka dheeraad ay in ay khasab tahay in uu qofku caafimaad qabyo si uu uga qeyb qaato Camp Grosvad. Canuggi yimaada isagoo xanuunsan ama meesha ku dhex xanuunsada guriga ayaa loo diri doonaa.

Degmada Finspång waxay sidoo kale hubin doontaa in ay jiraan fursado fiicfiican oo gacmaha saabuun iyo biyo lagula dhaqan karo.



FINSPÅNG

Macluumaad farsamo


Halkan waxaad ka heli kartaa macluumaad farsamo ku khuseeya adigaaga hal canug ama dhawr carruur ah ku qoray Camp Grosvad.

- Camp Grosvad waa isniin-khumiista, inta u dhexeysa: 10-15.
- Maalin walba ayey koox kasta goonideeda ugu kulmeysaa meelaha kala duduwan ee ay kooxuhu ku kulmayaan, ee meelaha isboortiga Grosvad saacaddu marka ay tahay 10.00.
- Canuggaagu qado lacag la'aan ah ayuu ka cunayaa O'Learys maalin walba.. Xasaasiyadaha waxaa horay loo soo sheegay marki la isi soo qorayay.
- Maalin usbuuca ka mid ah waxay Medley abaabuli doontaa hawlo dhaqdhaqaaq oo carruurta oo dhan loogu tala galay, sidaas darteed waxaad u baahantihiin in ay heystaan dhar dabaal.
- Marka aan Finspång dibaddeeda u tamashle tageyno waxaa dhici karta in waqtiyada Camp Grosvad wax laga beddelo - waxaan taas idinku soo wargelineynaa waqti fiican ka hor.
- Wax ay fiicantahay in mar walba boorsada lagu wato: Shukumaan, dhar dabaal, dhar roob, dhar dharka lagu beddesho, caagadda biyaha iyo kareemka qorraxda.
- Maskaxda ku hay in aad canuggaaga u gelisid dhar aan damqeyn iyo in aad boorsada u soo gelisid dhar uu dharka ku beddesho.
- Loos waa mamnuuc inta la joogo Camp Grosvad.
- Annagu mas'uul kama nihii wixii dhuma inta la joogo Camp Grosvad.

FG! Hubi in aad e-mailka xaqiijinta ka hubsatid usbuucyada canugga la qoray maadaama aysan noo suurta gal ahayn in aan qaabilno canug aan diiwaangashaneyn.

Khariiddadda ayaad ka arki kartaa meelaha lagu kulmayo ee kooxaha kala duduwan.

Arena Grosvad





F I N S P Å N G

Si wadajir ah ayaan faafitaanka cudurka u joojineynaa - raaca talooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada!

- Gacmaha dhaqa - ugu yaraan 30 ilbiriqsi
- Dadka masafo u jirso – xeerka 2-mitir ilaa inta aad awooddid.
- Guriga joog haddii aad xanuunsantihid! Waa muhiim in canuggaagu uu guriga joogyo haddii uu canuggu xanuunsanyahay. Haddii adigu ka waalid ahaan aad xanuunsantihid canuggaaga caafimaadka qaba weli wuu ka sii qeyb qaadan karyaa Camp Grosvad, laakin adigu waa in aad guriga joogtaa oo aadan keenin ama wadan canuggaaga. Calaamooyinka cudurka ee caadiga ah:
 - Feebaro
 - Qufac
 - Diif
 - Dhuun xanuun

La soco wararkii ugu dambeeyay

Wax dheeraad ah oo ku aaddan Camp Grosvad ka akhriso barta intarneetka ee:

finspang.se/campgrosvad

Bogga intarneetka ee degmada Finspång ayaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan feyruska corona: finspang.se/coronaviruset

Haddii aad su'aalo qabtid

Haddii aad su'aalo ka qabtid Camp Grosvad waxaad la xiriiri kartaa hoggaankeenna ugu muhiimsan Malin Fritiofsson ama horuumariyeheenna xilliga firaqada Fredrik Franzén.

Malin Fritiofsson

072-084 03 60

malin.fritiofsson@finspang.se

Fredrik Franzén

0122-850 45

fredrik.franzen@finspang.se

Si kal iyo laab ah ugu soo dhawaw Camp Grosvad, waxaan u xiisa qabnaa in aan idinla kulanno, waxaanna rejeyneynaa in aad u raaxeysan doontaan sida aan u raaxeysaneyno!

Salaan saaxibtinimo,

Shaqaalaha Camp Grosvad